



Macluumaadka maalgelinta daymeed: Meelaha biyuhu ka soo burqadaan ayaa dib loogu soo celiyay dugsiyo badan, shaqadau waxay ka sii socotaa Grant

Shaqada mashruuca maalgelinta daymeed ee PPS waxay ka sii socotaa dhinacyo badan.

Kooxda tayada biyaha ayaa beddelay tuubada halka biyuhu ka soo baxaan “water fixtures” ee kooxdii ugu horreysay ee 15 dugsi iyaga oo dib u tijaabinaya biyaha dugsi kasta. Marka natiijooyinka baaritaanka biyaha ay muujiyaan in tayada biyaha ee ka soo baxaya halka qasabadaha biyaha laga cabo ka soo baxaan “drinking faucets” ay ka wanaagsan yihiin talo soo jeedinta EPA ee dugsiyada biyahooga dib loo daaray. Biyuhu waxay hada mar kale dib uga socdaan Astor, Chapman, Hayhurst, Richmond, Sacajawea, Skyline, Woodstock iyo West Sylvan.

Baaritaanku wuxuu hada ka socdaa Beverly Cleary/Fernwood, Chief Joseph, iyo Rose City Park. Kooxda tayada biyaha waxay filayaan in dugsiyadani ay si dhakhso ah u awoodi doonaan in ay mar kale isticmaalaan meelaha biyaha laga cabo “drinking fountains”. Shaqada lagu beddelayo tuubada halka biyaha laga cabo ka soo baxaan soo baxaan “drinking fixtures” ee 15 dugsi ee xiga waxay bilaabmi doontaa Diisambar.

PPS waxay qorshaynaysaa meelaha biyaha laga cabo “drinking fountains” iyo halka qasabadaha biyaha laga cabo ka soo baxaan “faucets” ee ku yaala dugsiyada oo dhan la beddelo xagaaga 2018-ka. Tani kuma jiraan qasabadaha biyuhu ka soo baxaan ‘facets’ ee ku yaala qololka taasi oo la beddeli doono wakhti dambe iyada oo qayb ka ah shaqada ADA ee ay degmada qaban doonto. Haddii uu dugsi u baahan yahay dib u hagaajin ballaaran oo ka badan bedelaada tuubada halka biyuhu ka soo baxaan ee kor lagu qeexay, shaqadan waxay noqonaysaa in si gaar ah loo qorsheeyo sababta oo ah saameynta dhanka dhismaha ee ay ku yeelan karto dugsi.

Isbedelka Dugsiga Sare ee Grant wuxuu u socdaa si xawli ah iyada oo dhismihii muhiimka ah ee jimicsiga la burburiyay toddobaadkii la soo dhaafay. Isla mar ahaanta, duminta gudaha iyo yarayntu wuxuu ka sii socdaa dhismaha muhiimka ah iyada oo qodida ay ka sii socoto salka hoose ee goobta jimicsiga ee cusub. Goobtii jimicsiga ee asalka ahayd ee la dhisay sanadihii 1920-kii sideedii hore ayay ahaan doontaa dib ayaana loo cusboonaysiiyay si ay u noqoto dhismaha cusub ee farshaxanka. Grant waxaa la qorsheeyay in dib loo furo bilowga sanad dugsiyeedka 2019-20-ka.

Qorsheynta casriyeynta Dugsiga Sare ee Madison iyo dib u dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg ayaa hadda socda. Iyadoo muwaadiniinta muhiimada la siinayo, Kooxaha Tala bixinta Naqshada (DAG) ayaa laga sameeyay dugsi kasta iyada oo Kellogg DAG ay dhowr jeer kulmeen. Kooxahan waxay ka turjumayaan ballanqaadka joogtada ah ee ka qayb qaadashada bulshada iyo talooyinka muhiimka ah, taasi oo weli mudnaanta ah marka aan dib u dhisno dugsiyadeena. Kooxaha tala bixinta iyo Kulanka Naqshadeynta ee Bulshada ee soo socda waxay ardayda iyo bulshooyinka dugsiga siiyaan fursad ay ku bixinayaan talo waxtar leh oo loogu talagalay naqshadeynta dugsiyadeena cusub ee la casriyeeyay.

-David Mayne